



Maine

**Ka Hadlka Dhibaataynta iyo Takooridda ama Kala-Saarka Dugsiyadeena:
Toban Waxyaabood oo WAALID AMA MAS'UUL Walba in Uu Ogaadaa**

- **Dhibaataynta, ka saarista, iyo fursadaha sinaan la'aanta sababo la xiriira jinsiyad, diin, asalka aad ka timid waa wax caadi ku ah dhammaan iskuulada Maine.** Warbixintayagu waxay qorayaan khibradaha la midka ah ee ardayda ku nool gobolka oo dhan. Khibradahaasi waxay leeyihiin saameyn maskaxeed iyo waxbarasho ee ardayda, waana in la iska indha tirin.
- **Inta badan iskuulaadka Maine ma sameynayaan wax ka qabasho ku filan dhibaatooyinkaas.** Warbixinteenu waxay muujineysaa in ay jiraan dhowr arrimood oo muhiim ah iyo caqabado Maine. Marka hore, waxaa jira wacyigelin la, aan macalimiinta ee midab takoorka iskuulada. Marka labaad, xitaa markay ogaadaan dhibaatada, shaqaaluhu waxay leeyihiin dhaqaale xaddidan oo wax looga qabanayo oo badanaaba ma garanayaan halka laga bilaabo.
- **Waxaa jira dad ku caawin kara dugsigaaga.** Shaqaalaha bulshada, macalimiinta, iyo maamulayaasha waxay awood u yeelan karaan inay u doodaan ardayda. Ha ka shakinin inaad codsatid kulammo, rikoorka ardayga, ama dalbo hab cadaalad ah meel kasta oo ay khuseyso.
- **Ka qayb qaadashada waalidku waxay muhiim u tahay isbedelka iskuulaadka.** Macallimiinta iyo maamulayaasha ka hadlaya dhacdooyinka ay markhaati ka yihiin ayaa mararka qaarkood lagu eeddeeyaa inay isku khilaafsan yihiin muran ama siyaasad, taasoo keeni karta inay diidaan inay tallaabo qaadaan. Taageerada waalidku waxay u sahlayaan macallimiinta iyo maamulayaasha inay ka hadlaan.
- **Waalid ahaan ama masuul, waxaad xaq u leedahay inaad u dooddo ardaygaada.** Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan dhacdo ilmahaaga ee iskuulka, waxaad xaq u leedahay inaad la kulanto macalimiinta iyo/ama maamulaha. qofna waa inuusan dareemin inaad adigu dhibeyso markaad si fudud u weydiiso in ardaygaagu helo dhamaan waxbarashada iyo adeegyada ay u qalmaan. Mar kasta oo aad haysato kulan ama wicitaan shaqaalaha iskuulka isku day in aad qorto waxkasta oo la dhaho iyo,

(haddii ay jiraan wax) iskuulku ogolaaday inuu sameeyo. Haddii aadan Ingiriisiga ku hadlin, waxaad waydiisan kartaa iskuulka inuu turjubaan ku siiyo kuwaas sheekooyinkaas.

- **Uma baahnid inaad kaligaa maamulka la kulanto.** Waxaad soo wadan kartaa saaxiib ama qaraabo ku caawiyo si uu kuugu doodo ardaygaada. In aad haysato qof kula jooga kulanka ayaa laga yaabaa in aad dareento welwal la'aan, waxayna sidoo kale kaa caawineysaa in ay ku xasuusiso dhammaan wixii laguu sheegay iyo laguu qabtay kulanka.
- **Iskuul kasta waxaa looga baahan yahay inuu lahaado sharci cad oo looga hortagayo dhibaataynta iyo u xoogsheegashada.** Waa inay sidoo kale leeyihii nidaam ardayda iyo waalidiinta u soo gudbiyaan dacwooyinkooda. Waxaad xaq u leedahay inaad aragto qorshayaasheena iyo nidaamyada haddii aad waydiisato.
- **Waxaa jira siyaabo kale oo aad ugu doodti kartid ilmahaaga haddii la hadalka macalimiinta iyo maamulaha uusan kuu shaqayn.** Waxaad sidoo kale dacwad u gudbin kartaa guddiga iskuulaadka ama Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Maine. Maclumaaadka ku saabsan sida loo helo taas waa boga internetka: www.aclumaine.org/webelonghere
- **Udoodidda guddiyada iskuulaadka ayaa gaar ahaan muhiim ah.** Guddiga dugsiga ayaa u malaynaya inuu raadsanayo talooyinka guud ee siyaasadda iyo go'aan qaadashada, guddiyo badan oo dugsiyadu waxay u oggolaanayaan inay faallo ka bixiyaan inta lagu jiro shirarka. Haddii kale, guddiyo badan oo dugsiyadu waxay dhiirigeliyaan isgaarsiinta sida emails ama telefoonnada taleefanka ee jawaab celinta ku saabsan siyaasadda. Shirarka guddiga dugsiga waxay u furan yihiin dadweynaha, wakhtiga iyo ajandaha shirarka waa in lagu dhajiyo internetka. Haddii aad go'aansato inaad ka hadasho shir gudiga dugsiga, ha ka baqin. Isku day in aad diyaariso waqtii kahor adoo baraya waxa aad sheegi doonto.
- **Waxay qaadataa bulshada oo dhan si isbedel loo sameeyo.** Waxaa jira ururo badan oo u doodaya xuquuqda waalidiinta iyo ardayda, oo ay ku jiraan Ururka Shaqaalaha Rayadka ee xoriyad doonka ah ee Mareykanka (*American Civil Liberties Union - ACLU*) gobolka maine. Waxaad ka arki kartaa liiska internetka: www.aclumaine.org/webelonghere. Haka shakinin iaad la xiriirto.

Wixii maclumaaad dheeraad ah, tag boga
www.aclumaine.org/webelonghere.